

Wargeyska Provider Hub | Juun 2026

Fariintan waxaa loo diray dhammaan dadka iska diiwaangeliyey wargeyska Provider Hub. Haddii qof kuu soo gudbiyey fariintan, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad [si toos ah isu diiwaangeliso](#).

Xagaaga wanaagsan! Waa kan wargeyskaaga Provider Hub ee bisha Juun, oo ay daabacday Dowladda Gobolka Minnesota. Qaybtan waxaad ka heli doontaa:

- Faahfaahin ku saabsan horumarrada lagu sameeyey astaanta Enrollment & Attendance ee Provider Hub
- Casuumaad laguugu martiqaadayo inaad ka qaybqaadato cilmi-baarista naqshadaynta
- Talooyin loogu talagalay xarumaha daryeelka carruurta oo ku saabsan sida loo codsado isbeddello lagu sameeyo barnaamijkooda
- ... Iyo waxyaabo kale oo badan!

Wararka muhiimka ah

Horumarro lagu sameeyey astaanta Enrollment & Attendance ee Provider Hub si loo taageero isticmaalka la ballaariyey ee bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee ka diiwaangashan Child Care Assistance Program

Horaantii bisha Juun, Dowladda Gobolka Minnesota waxay cusboonaysiisay astaanta Enrollment & Attendance (E&A) ee Provider Hub si loo hagaajiyo waayo-aragnimada isticmaalaha loona hubiyo in astaantani ay buuxiso shuruudaha Child Care Assistance Program (CCAP).

Waxa aan cusboonaysiinnay

Waxaan ku darnay meelo xog cusub lagu geliyo oo ku jira isku-darka **child care management system (CCMS)** iyo ikhtiyaarka **soo gelinta macluumaadka xaadiritaanka** si loo diiwaangeliyo qofka gelinaya waqtiyada keenista iyo qaadista carruurta.

Waxaan sidoo kale horumarinay habka **soo gelinta macluumaadka xaadiritaanka** — ikhtiyaarkan cusub, bixiyeyaasha daryeelka carruurta hadda waxay awoodaan inay:

- Geliyaan waqtiyo badan oo gelitaan iyo bixitaan ah oo ilmaha loogu diiwaangeliyo isla maalintaas (tusaale ahaan, haddii ilmaha daryeelka yimaado ka hor iyo ka dib dugsigu)
- Hal mar soo geliyaan xog badan, iyadoo la kordhiyey xadka cabbirka faylasha .CSV
- Si sahlan u aqoonsadaan una saxaan khaladaadka gelinta xogta ee ku jira qaabka (template-ka)
- Ku soo geliyaan macluumaadka ilmaha, mas'uulka iyo xaadiritaanka hal fayl oo .CSV ah
- Geliyaan waqtiyada dhabta ah (ee aan ku koobnayn kordhin 15-daqiiqo ah)

Sida astaanta Enrollment & Attendance u shaqayso

Astaanta Enrollment & Attendance (E&A) waxaa heli kara xarumaha daryeelka carruurta.

Waxay leedahay saddex ikhtiyaar oo lagu diiwaangeliyo macluumaadka isdiwaangelinta iyo xaadiritaanka carruurta ku jirta barnaamijkaaga gudaha Provider Hub:

Kiosk

Waalidiinta ama dadka waaweyn ee la aaminsan yahay waxay isticmaalaan kiosk-ka Enrollment & Attendance ee Provider Hub oo ku jira taleefan, tablet ama kombiyuutar uu bixiyaha diyaariyey si ay carruurtooda ugu diiwaangeliyaan gelitaanka iyo bixitaanka barnaamijka. Tani waa ikhtiyaar bilaash ah oo la mid ah sida nidaamyada gaarka ah ee elektaroonigga ah ee xaadiritaanku u shaqeeyaan.

Soo geli macluumaadka xaadiritaanka

Barnaamijyada daryeelka carruurta ee isticmaala child care management system (CCMS) aan hadda ku xirnayn Provider Hub, isla markaana aan doonayn inay isticmaalaan ikhtiyaarka kiosk-ka, waxay si gacanta ah u geli karaan uguna soo gudbin karaan macluumaadka ilmaha, mas'uulka iyo xaadiritaanka hal fayl oo xaashida xogta .CSV ah.

Isku-darka child care management system (CCMS)

Barnaamijyada daryeelka carruurta ee isticmaala nidaamyo gaar ah oo xaadiritaan ah waxay dejin karaan xogtooda xaadiritaanka si ay si toos ah uga soo wareegto nidaamkaas una gasho astaanta E&A ee Provider Hub.

Hadda, Arux, Brightwheel iyo Daily Connect waxay ku xiran yihiin Provider Hub. Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay ka shaqaynaysaa inay ku darto isku-darrooyin dheeraad ah oo lala yeesho bixiyeyaal badan oo CCMS ah.

Shuruudda xaadiritaanka elektaroonigga ah ee qaar ka mid ah bixiyeyaasha Child Care Assistance Program

Laga bilaabo Juun 22, 2026, qaar ka mid ah bixiyeyaasha lacagta ka hela Child Care Assistance Program (CCAP) waxaa looga baahan yahay inay isticmaalaan astaanta Enrollment & Attendance (E&A) ee Provider Hub si ay ugu soo gudbiyaan macluumaadka xaadiritaanka carruurta Department of Children,

Youth, and Families (DCYF). DCYF waxay bixiyeyaashan daryeelka carruurta u dirtay ogeysiis 90 maalmood ah bishii Maarso 2026 si loogu wargeliyo shuruuddan.

Ugu dambayn, dhammaan bixiyeyaasha lacagta ka hela CCAP waxaa looga baahan doonaa inay xaadiritaanka ku soo gudbiyaan Provider Hub. Hase yeeshee, haddii aadan helin ogeysiis boosto ah oo ka yimid DCYF, kama mid tihid kooxda koowaad ee hirgelinta waxaana lagaa rabin inaad buuxiso waqtiga kama dambaysta ah ee Juun 22, 2026.

Mid kasta oo ka mid ah saddexda ikhtiyaar ee E&A ee Provider Hub — kiosk, import attendance information, iyo isku-darka CCMS — waxaa heli kara xarumaha daryeelka carruurta si ay ugu gudbiyaan macluumaadka xaadiritaanka.

Macluumaad dheeraad ah, booqo New [Electronic Attendance Record Requirement | Minnesota Engage DCYF](#).


[Kor ugu nogo](#)

Isdiiwaangeli fursadaha jawaab-celinta iyo cilmi-baarista naqshadaynta

Ma tahay bixiye hadda isticmaala ama mustaqbalka isticmaali doona Provider Hub? Ma rabtaa inaad nala wadaagto khibradahaaga? Buuxi [foomkan](#) si aad noogu sheegto.

Kooxda Provider Hub waxay si joogto ah ula sameeyaan bixiyeyaasha cilmi-baaris iyo tijaabin (taas oo loo yaqaan “cilmi-baarista naqshadaynta”). Jawaab-celinta aan helno ayaan u adeegsanna sii dhisidda iyo hagaajinta aaladda onlaynka ah.

Cilmi-baarista naqshadaynta gudaheeda, ma jiraan jawaabo khaldan: “Tani imtixaan adiga lagugu qaadayo ma aha; waa imtixaan lagu tijaabinayo Provider Hub.”



Marka aad buuxiso [Foomka Xiisaha Fursadaha Jawaab-celinta](#), magacaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka waxaa lagu dari doonaa liis. Kooxda Provider Hub ayaa markaas liiskan u adeegsata inay la xiriiraan bixiyeyaasha marka ay soo baxaan baahiyo cilmi-baariseed.

Foomka wuxuu ku weydiinayaa faahfaahin ku saabsan barnaamijkaaga iyo noocyada cilmi-baarista ee aad xiisayn karto (sahamino, wareysiyo, ama aqoon-is-weydaarsiyo). Tani waxay naga caawisaa inaan ku waafajino fursadaha jawaab-celinta bixiyeyaasha ku habboon.

Waad ku mahadsan tahay inaad bixisay waqtigaaga iyo khibradaada!

[Kor ugu noqo](#)

Talooyinka Provider Hub

Keydi ilahaaga shatiga/shahaadaynta si aad si degdeg ah ugu hesho

Ma u baahan tahay xusuusin ku saabsan sida looga jawaabo provider action ka yimid qofka ku siiyey shatiga? Ma hubtaa nooca change request ee aad isticmaali lahayd? Ma rabtaa caawimaad ku saabsan sida shaqaalahaaga loogu daro Provider Hub si ay uga caawiyaan maareynta shatigaaga?



Tilmaamo tallaabo-tallaabo ah oo ku saabsan arrimahan iyo hawlo kale waxaad ka heli kartaa **learning library**-gaaga.

Waa maxay learning library?

Learning library-ga wuxuu hal meel ku ururiyaa dhammaan agabyada la heli karo ee kaa caawinaya inaad ku maareyso shatigaaga ama shahaadayntaada gudaha Provider Hub.

Nooc kasta oo barnaamij ah oo Provider Hub u adeegsada shati ama shahaadoayn wuxuu leeyahay learning library u gaar ah — xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh, xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadaysan, iyo hay'adaha EIDBI.

Marka aad gasho Provider Hub, waxaad ka raadin kartaa maqaallo qaybta Help & Resources.



Hase yeeshee, shaqada raadinta uma shaqayso si aan rabno oo dhan — mararka qaarkood way adkaan kartaa in la helo maqaalka saxda ah ee aad u baahan tahay. Waxaan aburnay learning library si helitaanka caawimaadda u noqoto mid sahlan.

Qof kastaa wuu isticmaali karaa learning library-ga iyo maqaallada ku xiran ee ku dhex jira — looma baahna akoon Provider Hub ah.


Sideen u isticmaalaa learning library?

Marka hore, fur learning library-ga ku habboon nooca shatigaaga:


- [Certified Child Care Centers | Certification Learning Library](#)
- [EIDBI | Licensing Learning Library](#)
- [Licensed Child Care Centers | Licensing Learning Library](#)

Dib u eeg liiska waxa ku jira oo dooro mawduuca aad caawimaadda uga baahan tahay. Markaas waxaad tegi doontaa qaybta learning library-ga ee mawduucaas loogu talagalay, halkaas oo ay ku yaallaan xiriirro leh tilmaamo tallaabo-tallaabo ah.

Tusaale ahaan: Authorized Agent-ka xarun daryeel carruur oo shati leh ayaa hela iimayl sheegaya inuu wax ka qabto gudaha Provider Hub (“action needed”) — sida inuu soo geliyo dukumenti ama saxo khalad ku jira codsi. Wuxuu doonayaa xusuusin ku saabsan sida looga jawaabo. Sidaas darteed, wuxuu furayaa learning library-giisa wuxuuna ka dooranayaa Provider Actions liiska waxa ku jira.




Waxaa loo gudbinayaa qaybta learning library-ga ee mawduucaas loogu talagalay. Halkaas waxay ka helayaan qeexidda provider action iyo xiriirro loo maro laba maqaal oo dheeraad ah oo ay ka heli karaan macluumaad badan.



Xaggee ku yaal learning library-gayga?

Learning library-yada shatiga iyo shahaadaynta waxaa lagu xiriiriyey kor. Waxa kale oo aad ka heli kartaa qaybta [Resources ee bogga internetka ee Provider Hub](#).



Talo: Ku kaydi learning library-gaaga shatiga/shahaadaynta calaamad-bookmark ah biraawsarkaaga internetka si aad si fudud ugu hesho marka xigta ee aad caawimaad uga baahan tahay wax ka qabashada Provider Hub.

[Kor ugu noqo](#)

Xarumaha daryeelka carruurta: Ka hel caawimaad ku saabsan codsashada isbeddellada barnaamijka gudaha Provider Hub

Isbeddellada xilliyadu badanaa waxay keenaan isbeddello ku yimaada saacadaha shaqada iyo da'da carruurta ay adeegaan xarumaha daryeelka carruurta. Oggolaansho uga codso qofka ku siiyey shatiga isbeddelladan adigoo gudbinaya change request gudaha Provider Hub.

Muddo ma ka soo wareegtay tan iyo markii ugu dambaysay ee aad gudbisay change request? Dib u xasuuso habraaca:

- [Certified Child Care Centers | Request a Change to Your Hours of Operation](#) — waxaa la cusboonaysiiyey bishii May!
- [Licensed Child Care Centers | Request a Change to Your Hours of Operation](#)
- [Licensed Child Care Centers | Request a Room Usage Change](#) — oo ay ku jiraan da'da carruurta lagu adeegayo meel hore loogu ansixiyey dhismahaaga gudaheeda

Ma u baahan tahay inaad gudbiso nooc kale oo change request ah? Caawimaad dheeraad ah ka hel qaybta change request ee certification/licensing learning library-gaaga:

- [Certified Child Care Centers | Certification Learning Library — change requests](#)
- [Licensed Child Care Centers | Licensing Learning Library — change requests](#)



Talo: Gudbi codsigaaga waqti ku filan ka hor inta aadan rabin in isbeddelka dhaqan galo. Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad iimayl u dirto qofka ku siiyey shatiga si aad u xaqiijiso in change request-kaaga la helay.

Change request-yo badan waxay u baahan yihiin in dib loo eego oo uu ansixiyo qofka ku siiyey shatiga ka hor inta aadan ku shaqayn karin macluumaadka cusub.

[Kor ugu noqo](#)

Sii-deyntii ugu dambeysay

Bixiyeyaasha ka diiwaangashan CCAP: Wakhtiga ogeysiiska digniinta ee cusboonaysiinta oo la kordhiyey

Marka bixiyeyaasha daryeelka carruurta u baahan yihiin inay cusboonaysiiyaan diiwaangelintooda Child Care Assistance Program (CCAP), hadda waxay heli doonaan ogeysiis gambaleel gudaha Provider Hub 90 maalmood ka hor taariikhda cusboonaysiinta.

Cusboonaysiintan waxaan samaynay bishii Abriil. Hore, bixiyeyaashu waxay heli jireen ogeysiiska 60 maalmood ka hor taariikhda cusboonaysiinta.

Hel caawimaad: Bixiyeyaasha daryeelka carruurta waxay ka heli karaan caawimaad cusboonaysiinta diiwaangelintooda CCAP gudaha Provider Hub iyadoo adeegsanaya [CCAP Provider User Guide](#) — soo dejiso hagaha si aad u hesho dhammaan macluumaadka ku jira.

[Kor ugu noqo](#)

Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh: Xiriirka agabka ee habraaca codsiga personnel/staff variance ayaa la cusboonaysiiyey

Habraaca codsiga personnel/staff variance ee Provider Hub ee xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh, xiriirka agabka sharxaya kala duwanaanshaha u dhexeeya Track 1 iyo Track 2 staff qualification variances ayaa cilad lahaa.

Waxaan cusboonaysiinay xiriirka bishii May. Hadda wuxuu isticmaalayaasha geeyaa [Staffing requirements for licensed child care centers](#) ee bogga Department of Children, Youth, and Families (DCYF).

Hel caawimaad: Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh waxay ka heli karaan caawimaad codsashada personnel variance gudaha Provider Hub — iyo mowduucyo kale oo la xiriira personnel/staff — [gaybta personnel ee licensing learning library-ga](#).

[Kor ugu noqo](#)

Wax badan ka ogow sii-dayntii ugu dambeysay

Eeg release notes-ka bilihii la soo dhaafay si aad u hesho faahfaahin ku saabsan cusboonaysiintan iyo kuwo kale:

- [Abriil 2026](#)
- [May 2026](#)

Dowladda Gobolka Minnesota waxay caadi ahaan sii daysaa horumarrada Provider Hub toddobaad kasta waxayna dirtaa release notes dhammaadka bisha.

Release notes-ka Provider Hub waxaa loo diraa isticmaalayaasha Provider Hub ee leh gelitaanka Delegated Authority (is-diiwaangelin looma baahna). Qof kastaa wuu eegi karaa kaydka [release notes-ka](#).

[Kor ugu noqo](#)

Ilo cusub iyo kuwa la cusboonaysiiyay

Xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadaysan: Tilmaamaha codsashada isbeddelka saacadaha shaqada oo la caddeeyey

Waxaan caddeynay tilmaamaha ku jira [Request a Change to Your Hours of Operation](#) ee xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadaysan.

Waxaan cusboonaysiinay maqaalkan bishii May kadib markii aan ka maqalnay isticmaalayaasha in nuqulkii hore aanu si sax ah ugu waafaqsanayn waxa xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadaysan looga baahan yahay inay sameeyaan. Waad ku mahadsan tihiin inaad naga caawiseen hagaajinta!

[Kor ugu noqo](#)

Xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadaysan: Sawirrada shaashadda ee maqaalka codsashada shahaado cusub ayaa la cusboonaysiiyey

Gu'gan, qaybo ka mid ah codsiga xarun cusub oo daryeel carruur oo shahaadaysan ayaa la hagaajiyey. Sidaas darteed, waxaan cusboonaysiinay sawirrada shaashadda ee [Apply for a New Certification — Phase 1](#) si ay ula jaanqaadaan waxa codsadayashu hadda ku arkaan Provider Hub.

[Kor ugu noqo](#)

Ku saabsan

Ku saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad onlayn ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan uguna maareeyaan shatiyada/shahaadooyinka, fursadaha maalgelinta, iyo barnaamijyada kale ee dawladda ee la heli karo.

Waxaan sii wadnaa hagaajinta aaladda onlaynka ah iyo dhisidda astaamo cusub. Inta aan sidaas samaynayno, bixiyeyaal badan ayaa heli doona gelitaanka. Faahfaahinta helitaanka hadda jirta ka eeg bogga internetka ee [Provider Hub](#).

Ku saabsan wargeyska Provider Hub

Wargeyskani wuxuu la wadaagaa macluumaad guud oo ku saabsan Provider Hub dadka hadda isticmaala iyo kuwa mustaqbalka isticmaali doona aaladda onlaynka ah, iyo sidoo kale dadka kale ee danaynaya. Waxaan dirnaa wargeys cusub oo Provider Hub ah qiyaastii labadii biloodba mar.

[Nuqulladii hore waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee Provider Hub.](#)

Wargeyskani ma beddelayo macluumaadka si toos ah loogu diro kooxo gaar ah — sida ogeysiisyada isticmaalayaasha hadda ee Provider Hub ama macluumaadka soo dhaweynta ee isticmaalayaasha mustaqbalka. Kuwaas si gooni ah ayaan u dirnaa.

La wadaag wargeyskan dadka kale

Ma taqaan dad kale oo xiisayn kara inay helaan wararka ku saabsan Provider Hub? U sii gudbi iimaylkan kuna dhiirigeli inay [si toos ah isu diiwaangeliyaan wargeyska](#).

[Kor ugu noqo](#)